

XEERKA n. 118 rep.

MAAMULKA WALAAYADA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA

MAAREEYAHA

MARKI UU ARKAY wareegtada madaxweynaha Jamhuuriyadda ee 9 disembar 1952, n. 2357;

MARKI UU ARKAY XEERKA nadaamiya n. 5 ee taariikhda 12 abriile 1950 kaas oo ku fidinaayo dhulka soomalida xeer n. 367 ku taariikheysan 20 seteembar 1936 oo ku saabsan nadaaminta dugsiyada la gumeystayaasha;

WUXUU XEEREYAY:

Qod. 1.

Dugsiyada sare ee talyaaniga ee dalka Soomaaliya waxaa loo go'aamiyaa sidan soo socota:

- Dugsi xirfadeed seddex sano shaqeynaya ee nooca ganacsiga;
- Dugsiga Dhexe — Saddex-sannadle ah;
- Dugsi Sare — laba-sannadle ha;
- Dugsi sare oo sigaar ah loo maamulo — saddex sannadle ah;
- Dugsiga sare ee cilmiga sayniska — shan sannadle ah;

Qod. 2.

Dugsiyada kor ku xusan waxa ay raacaan barnaamijyada iyo qaababka ay u shaqeeyaan dugsiyada horumarsan ee u dhigma. Isbeddel kasta oo dabiici dheeraad ah waxaa lagu sameyn karaa barnaamijyada kor lagu soo sheegay marka loo eego dhigidda luqadaha degaanka ah ee ay khuseyso, haddii fursadda la helo.

Qod. 3.

Kharashaadka agabka, qalabka waxbaridda iyo ka shaqeysiinta dugsiyada aan kor ku soo sheegnay waxa la saari doonaa qodobka 66 ee miisaaniyad sannadeedka maaliyadeed min 1 luulyo 1953 - 31 disember 1954 iyo qodobbada la midka ah ee sanadaha soo socda.

Muqdisho, 29 luuliyo 1953.

MAAREEYE
E. Martino

Arkay diiwaangelinta n. 37 ee R. D.
4 agoosto 1953.
